

# Xaaladda Waxbarashada Sare ee Soomaaliya: Koboc degdeg ah, ganacsiyeyn, iyo baahida sharciyeynta



August 2013

Waxaa faafiyey Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda, 2013  
Waddada Amira Hotel, KM5, Degmada Hodan, Muqdisho, Soomaaliya

### **Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda**

Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda waa xarun cilmi baaris oo madax bannaan, dhexdhexaad ah, aan macaash doon aheyn oo fadhigeedu Muqdisho yahay. Iyadoo ah xaruntii maskax-maalka ee ugu horreysay Soomaaliya, hadafkeedu waa inay xog iyo saameyn ku yeelato jaan-goynta go'aammada siyaasiga ah, iyadoo u mareysa daraasado cilmi-baaris iyo falanqeyn ku saleysan. Machadku wuxuu kaloo doonayaa inuu ka qayb qaato hana-qaadka iyo hirgalinta dhaqan aqoon iyo cilmi-baaris ku saleysan.

Bogga hore: Arday dhigata Jaamacadda Soomaaliya  
Sawir qaade: Cumar Faaruq

Rights: Copyright © Machadka Heritage ee Daraasaadka Siyaasadda

Xuquuqda: © Cumar Faaruq

Qoraalka waxaa lagu faafiyey hannaanka Oggolaanshaha Creative Commons

Ganacsi iyo macaash looma isticmaali karo

[www.creativecommons.org/licenses/by/nc-nd/3.0](http://www.creativecommons.org/licenses/by/nc-nd/3.0).

Kala soo bax qoraalka bogga: [www.heritageinstitute.org](http://www.heritageinstitute.org)



## Tusmo

<b>Cutubka 1aad: Nuxurka oo Kooban</b>	<b>1</b>
1.1 Natiijooyin	2
<b>Cutubka 2aad: Tabaha xog uruurinta</b>	<b>3</b>
2.1 Daraasadda Hey'adaha Waxbarashada Sare (HWS)	3
2.2 Qaabka xulidda meelaha la daraaseeyay	4
2.3 Su'aalsha cilmi baaristu ku qotonto, agabka xog uruurinta iyo falanqaymo	4
2.4 Xadidnaanta xogaha la adeegsaday	4
<b>Cutubka 3aad: Taariikhda waxbarashada Soomaaliya</b>	<b>5</b>
3.1 Waxbarashadii xilliyadii gumaysaga ka horreeyay iyo xilliyadii gumaysiga	5
3.2 Waxbarashada xilligii ka dambeeyay gobannimada	5
3.3 Waxbarashadi ka danbeeyay 1991-dii	6
<b>Cutubka 4aad: Xaaladda ay ku sugantahay waxbarashada sare xilligan</b>	<b>7</b>
4.1 Ifa-faalaha koboca HWS	7
4.2 Tirada ardayda	7
4.3 Tirada macallimiinta	8
4.4 Heer aqooneedka macallimiinta	8
4.5 Tirada kulliyadaha iyo qaybahooda	9
4.6 Sida ardaydu u kala dhigtaan kulliyadaha	10
4.7 Kaabayaasha	11
4.8 Tayada Cilmi baarista iyo bandhig qoraaleedka	11
4.9 Xirirka kala dhexeeya jaamacadaha kale	11
4.10 Maamulka waxbarashada sare	11
4.11 Qaab dhismeedka maaliyadeed	12
4.12 Baahida iyo caqabadaha soo wajaha HWS	12
<b>Cutubka 5aad:Gunaanad iyo talo bixin</b>	<b>14</b>
Talooyin	15
Lifaaq 1: Dulmar guud HWS ee la daraaseeyey	16
Lifaaq 2: Is-bar-bar-dhigga Ardayda iyo Macallimiinta Hay'adaha W. Sare	17
Lifaaq 3: Noocyada Kuliyaaha iyo Tirooyinka ardayda ee gobol kasta	18
Lifaaq 4: Ilaha dhekhliga ee HWS	19

## Cutub 1: Nuxurka oo Kooban

Dagaalladii sokeeye ee qarxay sannaddii 1988 iyo burburkii ku yimid dawladdii dhexe sannaddii 1991 ayaa waxay waxyeello xooggan u gaysteen dhammaan adeegyadii bulshada dalka oo ay ka mid tahay qaybta waxbarashadu. Qaab dhismeedka waxbarashada ee Soomaaliya ayaa gebi ahaanba la burburiyay. Dagganaansho la'aan dabo dheeraatay iyo iska hor imaadyo aan kala go' lahayn ayaa waxay ku khasbeen dadka gudaha ku nool iyo bulshada caalamka inay dib u abuuraan adeegyadii waxbarasho ee waddanka oo ay maalgaliyaan. Burburkii ku yimid nidaamka waxbarashada ayaa waxa uu aad uga baaxad waynaa kan haleelay dhismayaashii, waxa lagu qiyaasay 80% maskaxdii waddanka inay ka baqooshay intii ka danbeysay markii dagaalladii sokeeye ay qarxeen (Lindley, 2008). Dagaallada iyo colaadda daba dheeraatay ayaa waxay ka hor istaageen carruurta iyo dhallinyarada Soomaaliyeed inay waxbarasho toosan helaan. Soomaaliya ayaa haatan la il-daran jahli aad u xooggan oo ku daray waddamada adduunka ugu hooseeya xagga aqoonta. (Cummings and van Tonningen, 2003).

Burburka ku yimid nidaamka waxbarashada Soomaaliya ayaa wax badanna ka horreeyay dagaalladii sokeeye. Khasaarihii foosha xumaa ee ka yimid dagaalki lala galay Itoobiya dabayaaqadii sannadihii 1970-meeyadii, iyo dhaqaalihii waddanka oo dumay intii lagu guda jiray sannadihii 1980-meeyadii ayaa waxay dhibaato xooggan u gaysateen dawladda isku xirnaanshaheedii, taasoo keentay in dawladda ay ka dhunto diiradda iyo dariiquba, meeshana ka saartay in sidii la rabay loo maalgeliyo waxbarashada iyo in la horumariyo qorshayaasha dawladda. Muddo aan sidaa u fogayn - kaddib marki ay nabadgalyada iyo daganaanshuhu-ba isa soo tareen qaybo ka mid ah waddanka - ayaa waxaa is xilqaamay qaybo kala duwan (oo ay ka mid yihiin Soomaalida dal joogta ah, midda qurbo joogta ah, hay'adaha gudaha iyo kuwa caalamiga ah, wakaaladaha gargaarka islaamiga ah iyo sidoo kale ganacsatada) waxayna wax la taaban karo kusoo kordhiyeen dib usoo noolaynta iyo horumarinta waxbarashada.

Dawladda la magac baxday Somaliland ee waqooyiga galbeed ee Soomaaliya ayaa ka hirgalisay dhulka hoos yimaadda nabadgalyo iyo dagganaansho saldhigtay teer iyo markii udbaha loo taagay 1991-dii, taasoo keentay in heerka uu gaarsiisan yahay dib u dhiska nidaamka waxbarashada ee gobolladaas uu si la taaban karo uga horreeyo qaybaha kale ee dalka. Sidoo kale ismaamul goboleedka Puntland ee looga dhawaaqay waqooyi bari ee Soomaaliya ayaa iyaguna horumar xooggan oo dib u dhiska wax barashada ah ku tillaabsaday illaa iyo markii lagu dhawaaqay sanaddii 1998-dii. Nabadgalyo darrada dabo dheeraatay, iska hor imaadyada goos-gooska ah, iyo jahwarereerka hannaanka siyaasadeed ee ku habsaday gobolada koonfureed iyo kuwo dhexe ee waddanka (halkan waxaa loo danleeyahay deegaanada loo yaqaan koofur iyo bartamaha Soomaaliya) ayaa waxay keeneen inaan marnaba la helin dib-u-dhiska nidaam waxbarasho oo tayo leh, si baahsanna uga hirgala gobolladaas oo idil.

Hase yeeshee koboca waxbarashada sare ee goor dhow curtay ayaa ah mid muuqda oo la taaban karo. Soomaaliya ayaa lahayd hal jaamacad oo kaliya, oo ay dawladdu leedahay, kuna taallay magaalada Muqdisho, ayna dhiganayeen in ku dhow 4000 oo arday sanadkii 1990-kii (Hoehne, 2010). Daraasaddan ayaa waxay muujinaysaa haatan inay waddanka ka jiraan in ku dhow 50 jaamacadood, oo kala baaxad wayn, ay dhigtaanna ku dhawaad 50,000 oo arday. Koboca qaybaha waxbarashada sare ee uu waddanku ku tillaabsaday, xilli dhibaatooyinkii colaadeed iyo dagganaansho la'aantii soo martay qaybo waddanka ka mid ah, ayaa ah mid ka hor imaanaysa fikrad aad loo aaminsan yahay oo oranaysa hoos u dhac iyo curyaannimo ayaa ku yimaadda horumarka dhaqaale iyo midka bulsho (sida waxbarashada) markii ay maqan tahay dawlad dhexe oo awood leh (Leeson, 2007). Maqnaanshaha dawlad dhexe oo leh awood xooggan iyo dowlad goboleedyo ayaa waxayba dhiirri galiyeen in la helo waxbarasho sare oo madax bannaan si gaar ahna loo leeyahay.

Maqnaanshaha Kormeer iyo indha ku hayn xooggan oo dawladeed dhammaan saddexda deegaan ee dalka iyo tayada shaqaalaha tan barayaasha iyo midda waxbarasho oo aad u hoosaysa ayaa u keenay nidaamka waxbarashada dhaawac. 86% oo ka mida HWS ee la waraysatay ayaa waxay ka cawdeen tayada barayaasha iyo shaqaalaha maamulka oo aad u hoosaysa. Arrintan ayaa waxay waxyeello muuqata u geesanaysaa hay'adaha gaarka loo leeyahay iyo kuwa dadwaynaha.

Inkastoo waxbarashada sare ay si aad u muuqata ugu baahday waddanka oo idil, haddana waxaa aad loo dheehan karaa inay maqan tahay warbixinno dheeraad ah oo lagala socon karo waxqabadka dhabta ah ee Hey'adaha Waxbarashada Sare (HWS). Daraasaddan aasaasiga ah ayaa waxay sawir ka bixinaysa HWS ee Soomaaliya iyada oo falanqayneysa xaaladda uu ku sugan yahay nidaamka waxbarasho ee waddanka, ayadoo soo bandhigaysa waxyaabihii kasoo baxay baaris la sameeyay febaraayo illaa Juun sannadda 2013, lagana sameeyey 44 jaamacadood oo ku kala yaalla bartamaha iyo koonfurta, Puntland iyo Somaliland.

Baaristani waxay hiigsanaysaa inay soo bandhigto muuqaalna ka bixiso xaaladda nidaamka HWS ee Soomaaliya, ayadoo laga fiirinayo arrimaha soo socda:

- Tirada hay'adaha, ardayda, iyo dadka ku hawllan arrimaha akadeemiyada iyo maamulka
- Tirada iyo nooca kulliyadaha
- Adeegyada la haysto (Sida maktabad, teknoolajiyada casri ah, iyo shaybaar cilmiyeed)
- Heerka iyo tayada aqooneed ee barayaasha
- Baaxadda cilmi baarista iyo bandhig qoraaleedyada
- Heerarka maal-galinta dibadda iyo tan gudaha
- Caqabadaha iyo baahida hay'adaha waxbarashada sare
- Heerka ku xirnaanta hay'adaha dhiggooda ah (gudaha iyo dibaddaba)

## 1.1 Natiijooyin

Xogta ugu muhiimsan ee lagu ogaaday cilmi-baaristaan waxa ka mid ah:

1. **Sare u kac muuqda ayaa ku yimid waxbarashada sare intii u dhaxaysey sanadihii 2004 iyo 2012-kii.** 44-ta xarumo waxbrasho sare ee lagu sameeyay daraasadda, 34 ka mid ah ayaa waxaa dhidibada loo taagay xilligaas. Ha yeeshee, xilliga uu ku beegnaa sare u kaca hay'adaha waxbarashada sare, waa ay ku kala duwanaayeen deegaannada dalka. Intii u dhaxaysay 2006 ilaa 2009, koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya koboca waxbarashada hoos u dhac ayaa ku yimid, taasoo ka dhalatay soo galiddii Itoobiya iyo burburkii Midowgii Maxaakimta Islaamiga ah.
2. **In ku dhow 50,000 oo arday ayaa ka diiwaan gashan jaamacadaha dalka.** 49% ka mid ah ardaydaas ayaa ka diiwaan gashan jamacadaha ku yaal koonfurta iyo bartamaha waddanka, halka 35% arday ay wax ka bartaan Somaliland, iyo Puntland oo saamiga ardayda HWS dhigta ay yihiin 16%. 56% dhammaan ardayda ayaa waxay dhigtaan 8 kamid ah 44 jaamacadood ee la daraaseeyay. Saddexda jaamacadood ee ugu sarraysa tirada ardayda ayaa waxay kala yihiin Jaamacadda Muqdisho (10.2%), Jaamacadda Soomaaliya (7.8%), iyo Jaamacada Hargaysa (7.6%).
3. **Tirada ugu badan ardayda ayaa waxay ka diiwaan gashan yihiin kulliyadaha la xiriira maaddooyinka ganacsiga iyo culuumta tiknoolajiyada (IT-da).** Inkastoo macaahidda waddanku ay bixiyaan maaddooyin iyo kulliyado aad u ballaaran oo kala gaddisan haddana 44% ardaydu waxay ka diiwaan gashan yihiin maaddooyinka la xiriira ganacsiga iyo culuumta teknoolajiyada (IT-da), iyo maaddooyinka kale ee aan sayniska ahayn.
4. **Qaar badan oo kamid ah jaamacadaha ayaa shaqeeya iyagoon haysan maktabad, adeegga IT-da, ama shaybaar.** 28 jaamacadood ayaa sheegtay inay haystaan maktabad ay buugaag taallo, marka la eego 44-tii jaamacadood ee lagu sameeyay daraasadda, halka 32 jaamacadood-na ay ka sheegeen inay haystaan ugu yaraan hal maktabad oo kombuyuutarro ah iyo qalab daabacaad. In ka yar kala bar jaamacadaha bixiya maaddooyinka la xiriira caafimaadka ayaa haysta sheybaar.
5. **Waxaa aad u liita tayada cilmi baariseed iyo tan bandhig qoraaleed ee HWS.** 15 kamid ah ah 44-ta jaamacadood ee la daraaseeyay ayaa sheegay inay mar uun ka qayb qaateen bandhig qoraaleed, hase yeeshee ma jirin jaamacad sheegtay inay sameysay amaba ka qayb qaadatay wax cilmi baaris ah. Ka arradnaanta awoodda cilmi baariseed ee haysa HWS ayaa waxaa u sabab ah iyadoo aysan jirin wax wada shaqayn iyo xariirro cilmi-baariseed ah oo ay leeyihiin dhexdooda ama la leeyihiin kuwa dibadda.

6. **Marka laga soo tago is diiwan galinta guud, waxaa aad u xaddidan xiriirka ka dhaxeeya maamullada iyo HWS.** Dhammaan jaamacadihii lagu sameeyay daraasadda ayaa isku raacay in inkasta oo ay xiriir la leeyihiin Dowladda Federaalka ah ama maamullada hoose, haddana wax kormeer iyo saamayn ah aysan ku lahayn howl-maalmeedka HWS. Markii la waydiiyay qolada maamusha siyaasadda waxbarashada sare ee goobaha ay ku yaallan jaamacadahaas, 20 ka mid ah 44-ta jaamacadood ee la daraaseeyay ayaa waxa ay xuseen in laga maamulo ururrada iyo dalladaha waxbarashad ee gudaha ka hawlgala.
7. **In ka yar 11% kamid ah 2,501-ka bare ee ka hawlgala Jaamacadahan ayaa haysta shahaadada darajada (PhD) halka in ka badan kala bar ay haystaan darajada masterka, 39%-na ay haystaan darajada bachelor.** Inkastoo natijadani ay khusayso deegaannada oo dhan haddana waxa jira kala gaddisnaan xagga heerka ah; Soomaaliland ayaa ah deegaanka ugu yar marka la fiiriyo macallimiinta haysta darajada PhD-da, ayadoo loo barbar dhigayo Bartamaha iyo koonfurta Soomaaliya iyo Puntland.
8. **Lacagaha laga qaado ardayda ayaa ah isha ugu wayn ee dakhligu soo galo jaamacadaha.** Inkasta oo qaar kamid ah HWS ay helaan wax uun kaalmo dhaqaale ah, oo ka timaadda dawladda ama mid dibadda ah, laakiin inta badan hay'aduhu si ay u socodsiiyaan hawlahooda, waxay si toos ah ugu tiirsan yihiin lacagaha laga qaado ardayda.
9. **Dakhliga dhaqaale oo aad u kooban, qalabka waxbarasho oo aan ku filnayn, iyo tayo la'aanta kaabayaasha aqoonta iyo gudbinta adeegyada waxbarasho, ayaa ah caqabadaha ugu waaweyn ee heysta jaamacadaha.** Dhammaan 44-ta jaamacadood ee lagu sameeyay daraasadda ayaa waxay sheegeen in ay dhaqaale xumo ay dabartay awooddoodii wax qabad. Caqabadaha kale ee ay xuseen inta badan jaamacaduhu sida ay u kala muhiimsan yihiin ayagoo u kala horreeya ayaa waxay ahaayeen: ku filnaansho la'aan xagga agabka waxbarashada ah, dhantaalnaanta kaabayashaasha gudbinta adeegyada waxbarasho, shaqaalaha ku hawlan maamulka oo aan haysan khibrad iyo aqoon ku filan, ku filnaansho la'aan xaga qalabka wax barridda ah, shaqaalaha u diyaarsan inay gutaan shaqada macallinnimo jaamacadeed oo aad u yar iyo jaamacadaha oo aan haysan dhismayaal u gaar ah oo ay leeyihiin.

## Cutubka 2: Tabaha xog uruurinta

### 2.1 Daraasadda Hay'adaha Waxbarashada Sare (HWS)

Daraasaddan lagu sameeyay HWS ayaa waxaa la billaabay bishii labaad ee sanadkan 2013, ayadoo la booqday jaamacadaha ku yaalla koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya, Somaliland, iyo Puntland. Cilmi-baarayaasha ayaa soo booqan waayay qaar ka mid ah hay'adaha oo xarumo ku leh goobo ka tirsan Koonfurta-bartamaha dalka sababo la xiriira amni darro awgood. Wakhtiga oo aad u xaddidnaa ayaa sidoo kale iska hortaagay cilmi-baarayaasha inay soo booqdaan dhammaan HWS ee ku yaalla saddaxda aag ee loo qaybiyo dalka. Guud ahaan waxaa daraasadda lagu sameeyay 44 kamid ah HWS. HWS kasta waxaa la waydiinayay tirada ardaydooda, tirada macallimiintooda, inay warbixin kooban ka bixiyaan kulliyadaha, adeegyada ay bixiyaan, xiriirka ay la leeyihiin hay'adaha dhiggooda ah ee dibadda iyo gudaha-ba, iyo qaab dhismeedkooda maaliyadeed. Waxaa sidoo kale la waydiiyay hay'adahan inay xusaan qaar ka mida baahiyaha asaasiga ah ee ku taagan hadda. Waxaa xusid mudan in xogta laga soo ururiyay hay'ad kasta ee ku xusan warbixintan ay ka turjumayso xaaladdii ay hay'addu ku sugnayd wakhtigii la sameeyay xog uruurinta.

Shaxda 1-aad ee hoos ka muuqata ayaa xusaysa magacyada HWS ee laga soo qaaday waraysiga markii la samaynayay cilmi baaristaan.

**Shax 1aad: Liiska HWS ee la Daraaseeyay**

#	Magac	Aasasay	#	Magac	Aasasay
1	Jaamacadda Badwaynta Hindiya	1993	23	Jaamacadda Bariga Afrika	1999
2	Jaamacadda Muqdisho	1996	24	Jaamacadda Gaalkacyo ee Caalamigaa	2005
3	Jaamacadda Darul-Culum	1998	25	Machadka Tababarka Macallimiinta ee Garoowe	2005
4	Jaamacadda Xamar	1999	26	Jaamacadda Maakhir	2011
5	Jaamacadda SIMAD	1999	27	Jaamacadda Muqdishu- Xarunta Boosaaso	2008
6	Jaamacadda Islaamka	2001	28	Jaamacadda Puntland State	2004
7	Jaamacadda Banaadir	2002	29	Jaamacadda Puntland ee Culumta iyo Teknoolajiyada	2004
8	Jaamacadda Kismaayo	2005	30	Jaamacadda Boosaaso	2006
9	Jaamacadda Plasma ee Culumta iyo Teknoolajiyada	2005	31	Jaamacadda Culumta Caafimaadka	2006
10	Jaamacadda Soomaaliya	2005	32	Jaamacadda Admas	2006
11	Jaamacadda koonfurta Soomaaliya	2008	33	Jaamacadda Alpha	2009
12	Jaamacadda Hormuud	2010	34	Jaamacadda Camuud	1998
13	Jaamacadda Jazeera	2010	35	Jaamacadda Caalamigaa ee Badar	2012
14	Jaamacadda Salaam	2010	36	Jaamacadda Burco	2004
15	Jaamacadda Geeska Afrika	2011	37	Jaamacadda Eelo American	2007
16	Jaamacadda Horseed	2011	38	Jaamacadda Gollis	2005
17	Jaamacadda Jamhuuriya	2011	39	Jaamacadda Hope	2008
18	Jaamacadda Hope	2012	40	Jaamacadda International Horn	2004
19	Jaamacadda Job-Key	2012	41	Jaamacadda New Generation	2009
20	Jaamacadda Modern ee Culumta iyo Teknoolajiyadda	2012	42	Jaamacadda Nugaal	2004
21	Jaamacadda Caalamigaa ee Soomaaliya	2012	43	Jaamacadda Timacade	2009
22	Jaamacadda Darul-Xikma	2012	44	Jaamacadda Hargaysa	2000

Tirada guud ee jaamacadaha lagu sameeyay daraasadda ayaa waxaa ka muuqanaysa sida ay jaamacaduhu ugu kala tiro badan yihiin saddexda aag ee loo qaybiyo Soomaaliya. Daraasaddii aan samaynay ayaa waxaa ku caddaatay in jaamacado badan ay ku yaallaan koonfurta iyo bartamaha dalka, iyo Somaliland marka loo bar-bar dhigo Puntland. Tasmada hoos ka muuqata ayaa waxay xusaysaa sida 44-ta HWS ee la daraaseeyey ay aad ugu fidsan yihiin dalka: koonfurta-bartamaha dalka (50%), Somaliland (29.5%), iyo Puntland oo ah (20.5%).

## **2.2 Qaabka xulidda meelaha la daraaseeyey**

Maaddaama ujeeddadu ay ahayd in la soo uruuriyo xog ku saabsan xaaladda ay ku sugan yihiin HWS, waxaan ku dadaalnay sidii aan u gaari lahayn dhammaan jaamacadaha iyo HWS ee ka hawl gala dhammaan saddexda aag ee Soomaaliya. Daraasaddu waxa ay waxbarashada sare ku jaan-goowsay qeexidda soo socota: heerka waxbarasho ee ka danbeeya dugsiga sare lugana gaari garo darajo akadeemi ah. Qeexiddan ayaa hageysay tillaabooyinkii lagu xushay hay'adaha la daraaseeyay. Aag kasta Waxaan kala tashannay awoodaha gacanta ku haya waxbarashada gudaha iyo midda sare. Hase yeeshee, maadaama qaar kamid ah hay'adaha aan daraasaynayney ay hoos tagayeen ururro iyo dallado waxbarasho, xulashadu kuma anaan xirin inay hay'adaha la daraaseeyay ay ka diiwaan gashan yihiin maamulka ka taliya aaggaas.

## **2.3 Su'aasha cilmi baaristu ku qotonto, agabka xog uruurinta iyo falanqaymo**

Daraasaddan ayaa loo isticmaalay tabo isku dhafan sii loo uruuriyo xogaha tayada ku salaysan iyo kuwa tirada ku salaysan-ba. Sida caadiga ah waxaa su'aal daraasadeedka loo qaabeeyay in uu weeleeyo labada nooc ee xogta. Saddex cilmi-baare ayaa la xushay si waraysiyo loola yeesho jaamacadaha ku yaal waddanka oo idil. Min hal cilmi-baare ayaa laga xushay saddexda aag, tillaabooyinka xulashada ayaa lagu saleeyay khibradka ay u lahaayeen samaynta cilmi baarisyada noocaan ah - oo ay horay kuwo ula mid ah u sameeyeen - iyo iyaga oo sidoo kale si toos ah ugu lug leh nidaamka waxbarashada sare, sidaa darteedna ay aqoon u lahaayeen nidaamka wax barashada deegaannadooda.

Madaxa mashruuca ayaa u sharraxay cilmi-baarayaasha ujeeddooyinka daraasaddan laga leeyahay, xiriir joogta ahna la yeelanayay intii ay ku gudo jireen xog uruurinta. Madaxa mashruucan waxuu imtixaanay ama waraystay cilmi-baare kasta kaddib marki ay dhameeyeen daraasadda. Ugu danbayntii, xogtii la helay ayaa waxaa lagu shubay software-ka loo yaqaan SPSS, falanqayntii kasoo baxday ayaa lagu saleeyay warbixintan kama danbaysta ah.

## **2.4 Xaddidnaanta xogaha la adeegsaday**

Inkastoo xogta laga uruuriyay tiro ballaaran oo kamid ah jaamacadaha ku yaalla Koonfurta-bartamaha, Somaliland, iyo Puntland, haddana natiijooyinka daraasaddan kama wada tarjumayso dhammaan jaamacadaha jamhuuriyadda ku yaalla oo idil. Hirgalinta natiijooyinkan iyo talo bixinta ku beegan qaabaynta siyaasad waxbarasho waa inay ku xisaabtamaan kala gaddisnaanta muuqata ee saddexdan deegaan marka laga fiiriyo qaab dhismeedka dowladeed iyo weliba horumarka dhaqaale iyo mid bulshadeed-ba.



## Cutubka 3-aad: Taariikhda waxbarashada Soomaaliya

### 3.1 Waxbarashada xilliyadii gumaysiga ka horreeyey iyo xilliyadii gumaysiga

Soo gaaridda ama fididda Diinta Islaamka iyo afka Carabiga ay ku baaheen Soomaaliya iyo xiriirrada ganacsatada Soomaalida, bad-maaxyada, askarta iyo xujeeyda ay adduunka la lahaayeen, ayaa keentay in ay siyaabo kala duwan u helaan aqoon, iyaga ayaana dadka ku noolaa magaaloooyinka xeebaha ah ku soo kordhiyey waxbrasho iyo aqoon kororsi isugu jira tan Islaamka iyo tan reer galbeedka xilli aad uga horreeyey imaanshihii gumeystihii reer Yurub (Cabdi, 1998, Xuseen, 2007). Si kastaba ha ahaatee, bulshada Soomaaliyeed inteeda badan oo ahayd reer miyi, waxbarashadu waxay ku socotay waxbarasho bulshadii isku xilqaantay ahna mid aan habaysanayn. Duqowda iyo dadka waawayn ayaa isku xilqaami jiray sidii ay dhallinta u bari lahaayeen, taariikhda qabiilka, diinta, dagaalka, xirfadaha la xiriira siday uga badbaadi lahaayeen cadawga (Cabdi, 1998, Xuseen, 2007).

Awoodihii gumaysiga ee qabsaday dalka; Ingiriis-ka oo waqooyi galbeed u talinayay iyo Talyaaniga oo u talinayay koonfurta ayaa waxaa ku adkayd inay Soomaaliya ka hirgaliyaan waxbarasho nidaam ku socota. Ugu horrayntii, dadka Soomaaliyeed oo inta badani ay reer-miyi ama reer-guura yihiin (in kabadan 90% wakhtigaas) awgeed ayaa waxaa aad u adkaatay faafinta waxbarashada caadiga ah ama iskuullada loo tago (Cassanelli & Faarax, 2007). Midda labaad, waxaa aad u faaftay fikradda ah in waxbarashada ay gumaysigu wadaan ay tahay fidinta Diinta Kirishtaanka (Masiixiga) haddii caruurta la barana ay Diinta Islaamka ka baxayaan. Taasi waxay walwal iyo iska horimaad joogto ah u keentay bulshadii (Dawson, 1964). Ha yeeshee, horraanti qarnigii labaatanaad illaa dhexdiisii ayaa waxaa lagu tillaabsaday xoogaa horumar ah waxaana la taagay aasaas waxbarasho, khaas ahaan dhowrkii sano ee ka horreyay qaadashadii xorriyadda sannadii, 1960-kii.

Maammulkii ka jiray waqooyi galbeed (Somaliland) oo hoos tagayay Ingiriiska ayaa laban laabay dadaakiisii sannaddii 1957-dii, waxaa si muuqda kor ugu kacay maal-galinta dhinaca waxbarashada oo ahayd £500 oo kaliya sannadi 1939-kii laakin gaartay £340,000 (giniga ingiriiska) sannadii 1957-di (Dawson, 1964). Sidoo kale koonfurta ayaa intii lagu guda jiray tobankii sano ee loo yaqaanney xukunka daakhiliga ee Talyaanigu uu gaarsiinayay waddanka xornimada waxa ay ku tillaabsatay horukac muuqda waxaana abuurmay aasaas waxbarasho adag, oo ay kamid tahay waxbarashada sare (Dawson, 1964). Hase yeeshee, markii la qaatay xornimada waddanka kama jirin waxbarasho sare marka laga reebo dhowr dugsi sare oo uu dhisay gumaysiga Talyaanigu intii lagu guda jiray sanadihii xukunka daakhiliga ah.

### 3.2 Waxbarashada iyo xilligi ka dambeeyay gobannimada

Horumarinta waxbarashada ayaa markiiba noqotay waxa ugu horreeyay ee la dardar galiyay markii xornimada la qaatay ee dhidibbada loo taagay Jamhuuriyadda Soomaaliya sannadii 1960-kii. Fikradda ah kaalinta waxbarashadu ay ka gali karto horumarka shakhsiyeed iyo tan bulshaba-ba ayaa markiiba lagu muujiyay hees wadani ah oo uu allifay gabayaagi waynaa ee Soomaaliyeed Cabdullaahi Qarshe, miraheedana ay kamid ahaayeen "Aqoon la'aani waa iftiin la'aane" (Dawson, 1964). Hase ahaatee, isbadallada dhabta ah ayaa ahaa kuwa ishu aysan qaban oo aad nuxuus u ah, horumar koobanna waxaa lagu sameeyay aqoontii yarayd ee laga dhaxlay gumaysiga (Cassanelli & Faarax, 2007). Sababaha ay dawlaaddii cusbayd dib u habayn ugu samayn wayday una ballaarin wayday waxbarashada waddanka ayaa loo tiirin karaa dhowr caqabadood. Kow, ayada oo ay waddanka ka hirgashanaayeen labo nidaam oo waxbarasho oo kala duwan ayna kala keeneen laba gumeeyste oo waawayn, Ingiriiska iyo Talyaaniga, oo ku kala gaaddisnaa luqadda wax ku qoran qoran yihiin, manhajka la baranayo, oo aan wax shaqo isku lahayn, waxayna ahayd howl aan marnaba sahlamayn midayntooda (Dawson, 1964). Waxaa aad u adkaatay in la helo istiraatiijiyad wax ku ool ah oo bulsho aad u ballaaran oo reer miyi u badan lagu gaarsiin karo waxbarasho.

Kacdoonkii xoogagga ciidamada ee uu hoggaaminayay Jeneraal Maxamed Siyaad Barre sannaddii 1969-kii ayaa markiiba horumarro xooggan oo muuqda ka gaaray waxbarashada waddanka. Xukuumaddii millateriga ahayd ayaa waddanka kusoo kordhisay qorshayaal kacdoon dhaqaale iyo mid bulshadeed ah oo isdaba joog ah looguna magacdaray 'Hanti-

wadaag cilmi ku dhisan' – oo laga keenay fikirki hanti-wadaagga ee Markis iyo Lennin oo lagu dhafay mabaadi'da Diinta Islaamka. Qorshayaasha ay soo kordhisay dawladda ayaa waxaa kamid ahaa olole ballaaran oo lagu cirib tirayay umminimada iyo aqoon darrada. Sanadkii 1974-tii waxaa la howl galiyay tiro aad u badan oo kamid ah ardaydii iyo shaqaalihii dawladda si ay wax u baraan dadka daggan baadiyaha iyo meelaha ka fog magaalooyinka, taasoo keentay in dadka Soomaaliyeed ee wax qora ama akhriya oo ahaa 5% ay tiradoodu gaarto 55% (Cabdi, 1998). Sanadkii 1972-dii ayaa waxaa si rasmi ah loo aqoonsaday in qoritaanka afka Soomaaligu uu noqdo farta laatiinka; inkastoon laysku raacsanayn, haddana waxay arrintaas u gogol xaartay in nidaam waxbarasho oo midaysan uu waddanku gaaro. Waxbarashada sare ayaa horumarro muuqda laga sameeyey sanadi 1970-kii markii magaalada Muqdisho lagu xarig jaray Jaamacadda Ummadda Soomaaliyeed oo ka koobnayd kulliyado ay kamid yihiin saxaafadda, waxbarashada, caafimaadka iyo kuwo kaleba (Hoehne, 2010). Hase yeeshee, horumarkaan la gaaray ayaa wuxuu inta badan ku koobnaa magaalada Muqdisho oo kaliya. Waddanka intiisa kale lagama gaarin horumar waxbarashada sare ah oo muuqda.

Yididiilihii curdanka ahaa ee ay billowday dawladdii militeriga ahayd ayaa waxaa markiiba nuxuusiyay dagaalkii lala galay Itoobiya sannadii 1977-dii oo ahaa mid wiiqay cududda dalka oo idil, kaddib xukunkii Siyaad Barre markii uu ku guul darraystay inuu Itoobiya ka xoreeyo Soomaali Galbeed. Burbur dhaqaale ayaa soo food-saaray dalka taasoo keentay inuu hoos u dhac wayn ku yimaaddo horumarradii laga gaaray waxbarashada. Eex, musuq-maasuq, maamul xumo iyo hantida dadwaynaha oo lagu takri falo ayaa aad u baahday sannadihi 1980-meeyadii (Cabdi, 1998). Hoos u dhac aad u xooggan ayaa ku yimid tirada ardayda loo qaato waxbarashada: 1991-dii hey'adda Qaramada Midoobay ee UNESCO waxay 1980-kii ku warbixisay in ardayda da'doodu u dhaxayso 4 jir ilaa 23 jir ee loo qaato waxbarasho ay sanadkii-ba ahayd 14%, halka uu hoos ugu dhacay 7% sannaddii 1988-dii (waxaa soo xigtay Cabdi, 1998). Is qab-qabsi gudaha ah oo isu baddalay dagaal sokeeye ayaa ku dhufatay waddanka sanaddii 1988-dii taasoo keentay in 1991-kii uu burburbo qarankii oo dhan.

### **3.3 Waxbarashadii ka dambeeyay 1991-dii**

Dagaalladii sokeeye iyo qarankii oo dumay ayaa waxay keeneen in gebi ahaan-ba uu burburo aasaaskii waxbarashada ee uu dalku lahaa. Hase yeeshee, waxaa haddana wax qabad xooggan laga sameeyay dib-u-soo noolaynta aasaaskii waxbarasho ee dalka qaybihiisa oo dhan sida koonfurta iyo bartama, Puntland iyo Somaliland. Colaadda iyo nabadgelyo darrada daba dheeraatay ee ka jirtay koonfurta iyo bartamaha ayaa waxay adkaysay in dib loo dhiso waxbarashada laakiin marnaba ma aysan joogsan dadaalladii ay dadyow kala gadisani dib ugu soo noolaynayaan waxbarashada. Soomaalida gudaha ku nool, kuwa dibad joogta ah iyo hay'adaha Islaamiga ah ayaa dadaal xooggan u galay sidii ay u soo noolayn lahaayeen HWS. Sidoo kale, dalladaha iyo ururrada waxbarashada sida (FPENS) ayaa iyaguna kaalin wax ku ool ah ka qaatay dib u dhiska iyo maaraynta waxbarashada dhexe iyo tan sareba (Warbixinta Wasaaradda Waxbarashada, Hidaha & Tacliinta Sare, 2011). Cilmi-baare Markus Hoehne ayaa sheegay in wixii lagu gaaray sannaddii 2010-kii ay ka samaysmeen Muqdisho darsin jaamacado ah oo ay maal-galiyaan gacantana ku hayaan Soomaalida qurbo joogta ah iyo/ ama hay'ado Islaami ah (Heone, 2010).

Nabadgalyada iyo dagganaanshaha muuqda ee ay gaareen Somaliland iyo Puntland oo iyana aan ka liidan ayaa waxaa ka dhashay jawi ay ku shaqayn karaan hawl-wadeennada ku lugta leh dib usoo noolaynta waxbarashada, sidaa darteed, horumarka laga gaaray deegaannadaas ayaa aad uga sarreeya midka laga gaaray koonfurta-bartamaha (Bradbury, 2007). Gaar ahaan, horumarka Somaliland ayaa ah mid ballaaran. Tirada hay'adaha waxbarashada qaybaheeda kala duwan ayaa aad u batay. Tusaale ahaan, sannadkii 1999-kii, waxaa ka jiray Somaliland 144 dugsi hoose-dhexe iyo shan dugsi sare; marki ay ahayd 2010-kii kor ayay u kacday tiradoodu, waxayna noqdeen 917 dugsi hoose-dhexe iyo 84 dugsi sare (Tirakoobka Somaliland, 2011). Tirada ardayda loo diiwaan galiyay marxaladdaas waxbarasho ayaa iyana korodhay. Marki la helay waxbarashada hoose ee lacag la'aanta ah sanadkii 2011-kii ayaa waxaa 12% kordhay tirada ardayda laga diiwaan galiyay fasalka koobaad. Hase yeeshee, dugsiyada oo aan awood u lahayn inay la jaanqaadaan kororkaas awgiis ayaa waxaa laga maarmi waayay in arday badan la galiyo liiska sugidda (Qorshaha istiraatiijiga ah ee waxbarashada Somaliland, 2012-

2016).

Kororka waxbarashada heerarkeeda hoose-dhexe ayaa wuxuu keenay baahida ah in la helo waxbarashada heerka sare. Taa awgeed, waxaa sidoo kale tobankii sano ee tagay si xowli ah u kordhayay waxbarashadii sare. Soomaaliland ayaa waxaa ka hawl-galayay 23 machad Janaayo sannaddii 2013. Dhanka koonfurta-bartamaha, warbixinti ugu dambaysay ee ay soo gudbisay Wasaaradda Waxbarashada, Hidaha iyo Tacliinta Sare sannadkii 2011-ka ayaa sheegaysa in 15 jaamacadood ay ka howlgalayeen deegaannadaas (Warbixinta Wasaaradda Waxbarashada, Hidaha & Tacliinta Sare, 2011). Xilligaas kaddib waxaa si aan caadi aheyn u kordhay tirada jaamacadaha. Sidaa darteed, tirada ardayda dhigata jaamacadaha, tirada kulliyadaha iyo tirada ardayda qalin jabisa intuba kor ayay u kaceen.

Maamul-goboleedyada ayaa kaalin kooban ku lahaa walina ku leh marka laga hadlayo sida ay u shaqayso waxbarashada sare. Inta badan jaamacadaha waxaa leh, maal-galiya, maamula, gacantana ku haya, ururo iyo shakhsiyaad kala gaddisan hadday ahaan lahaayeen qurbojoog, ganacsato, bulshada gudaha ku nool, hay'adaha samafalka iyo ururrada Islaamiga ah ayadoo ay aad u yar tahay ka warqabka iyo kormeerka dawladda ama maamul-goboleedyada. Dhibaataada ugu wayn ee ka dhalatay fara gelin la'aanta iyo wax iska waydiin la'aantaas ayaa waxay tahay inaysan jirin cid u taagan kormeerka iyo gacan ku haynta tayada adeegga waxbarasho ee ay bixiyaan jaamacadaha ay tiradoodu xowliga u kordhayso. Arrintan ayaa saameyn weyn ku leh tayada waxbarashada. Qaar badan oo kamid ah ardayda qalin jabineysa waxaa ka maqan xirfaddii looga baahnaa suuqa shaqooyinka.

## **Cutubka 4aad: Xaaladda ay ku sugan tahay waxbarashada sare xilligan**

### **4.1 Ifafaalaha koboca HWS**

Xogta laga uruuriyay daraasaddan ayaa sheegaysa in kororka muuqda ee waxbarashada sare ee waddanka ay ahayd tobankii sano ee lasoo dhaafay. 44-ta jaamacadood ee lasoo daraaseeyay, 34 ka mid ah ayaa waxaa la aasaasay intii u dhaxaysay 2004 iyo 2012-kii. Kobocii ayuu hoos u dhac ku yimid intii u dhaxaysay sannadihii 2006 iyo 2010-kii, haddana waxaa dib u billowday kor u kicii intii u dhaxaysay 2010 iyo 2012-kii. Hal jaamacad oo kaliya ayaa laga unkay koonfurta iyo bartamaha Soomaaliya intii u dhaxaysay 2006 iyo 2009-kii, kaddib markii ay amni darro xooggani ka dhalatay soo galiddii Itoobiya iyo burburkii Midowgii Maxaakimta Islaamiga. Dhanka kale, Somaliland iyo Puntland, kor u kaca ayaan waxba iska baddalin illaa sanaddii 2011-kii. Shanta jaamacadood ee la aasaasay sannaddii 2012-kii ayaa dhammaantood ku yaal koonfurta-bartamaha, waxayna ahayd tiradii ugu badnayd ee HWS cusub laga aasaaso deegaankaas.


Iyadoo laysku raacsan yahay in waddanku uu lahaa hal jaamacad oo qura wixii ka horreeyay burburkii dawladdii dhexe sannaddii 1991-gii, astaamo horumar ayaa si xooggan looga dheehday koonfurta-bartamaha, Puntland iyo weliba Somaliland. Natijadan ayaa waxaa loo aanayn karaa labo sababood. Midda hore, in horumarkan waxbarashada sare uu la jaanqaadayo midka kasoo if-baxayay waddamada Afrika ee saxaraha ka hooseeya labaatankii sano ee lasoo dhaafay (Xuseen, 2007). Tan labaad, in maqnaanshaha dowlad dhexe iyo maamullada hoose ee deegaannada oo aan awood buuran lahayn ay dhiirro galisay in si gaar ah loo maal-gashado adeegyaddi bulshada oo ay waxbarashadu kamid tahay (Bradbury, 2007). Taas ayaa waxaa ka dhalatay in koboca nidaamka waxbarashada sare ee sida gaarka ah loo leeyahay, badeeco ahaan looga ganacsado, halka ay ka ahayd adeeg bulsho oo loo siman yahay, sidaa darteed ayaa waxaa suuqa waxbarashada ku soo biiray maal-gashadayaal.

### **4.2 Tirada ardayda**

Jaamacadaha ayaa waxaa laga codsaday tirada ardayda is diiwaan galisay xilliga la sameeyay waraysigan. Tirada guud ee ardayda ka diiwaan galshanaa 44-ta jaamacadood bishii June 2013 ayaa ahayd 51,471. Tirada ugu badan ardaydan waxaa ay ka diiwaan gashanaayeen

jaamacadaha ku yaalla koonfurta-bartamaha dalka (25,147), waxaana ku xiga Soomaaliland oo iyana ay ka diiwaan gashanaayeen (18,223), iyo Puntland oo ah (8,101).

**Muujiis 1: Sida ay ardaydu u kala joogaan deegaannada**



Tirada ardayda dhigata jaamacadaha ayaa si wayn u kala gaddisan. In ku dhow 56% guud ahaan ardayda ayaa dhigata toban jaamacadood. Tobanka jaamacadood ayaa kala ah: Jaamacadda Muqdisho (10.2%), Jaamacadda Soomaaliya (7.6%), Jaamacadda SIMAD (6.1%), Jaamacadda Gollis (5.4%), Jaamacadda geeska Afrika (5.2%), Jaamacadda Camuud (7.6%), Jaamacadda Plasma (5.2%), iyo Jaamacadda Hargaysa (7.8%). Kuwa ugu numberka yar ayaa waxaa ka mid ah Machadka Dar Al-xikma iyo Jaamacadda Salaama, oo labadabada laga furay koonfurta-bartamaha dalka sanadkii 2012, waxayna sheegeen inay hayaan min 100 arday.

Jaamacadaha ayaa waxaa la waydiiyay tirada ardayda iska diiwaan galisay fasallada heerka labaad waxbarashada sare ama (post-graduate). 44-ta jaamacadood ee laga qaaday waraysigan, lix kamida ayaa sheegtay inay bixiyaan Post-graduate (Jaamacadda Camuud, oo ku taalla Soomaaliland, Jaamacadda Hope, Jaamacadda Muqdisho, Jaamacadda Soomaaliya iyo Jaamacadda SIMAD oo ku yaalla koonfurta-bartamaha dalka iyo Jaamacadda Muqdisho xarunteeda Boosaaso oo Puntland ku taalla. Tirada guud ee ka diiwaan gashan gabi ahaan Post-graduate-ka ee shantan jaamacadood ayaa hadda isku ah 918 oo celcelis ahaan u dhiganta 1.2% tirada guud ee ardayda.

Halka arrin ee ay ka gaabisay daraasaddan ayaa ah inaan markii la uruurinayay xogta lagu kala soocin tirada labka iyo dhedigga, sidaa darteed tiro ahaan iyo celcelis ahaan-ba laguma hayo inta dumar ah ardayda dhigata jaamacadaha ku kala yaalla koonfurta-bartamaha, Soomaaliland iyo Puntland-ba ee lagu sameeyay daraasadda. Waxaa intaa ka dheeraad ah, maadaama aysan xogtani aysan cuskanayn tirooyin kaydsanaa, suurto gal maaha in la iska qiyaaso.

### 4.3 Tirada macallimiinta

Jaamacad kasta oo la waraystay ayaa waxaa la waydiiyay inta macallin ee ka hawl-gasha. Tirada guud ee dhammaan macallimiinta ka hawl-gala jaamacadaha Soomaaliya ayaa ah ah 2501. Marka laysku qaybiyo tirada macallimiinta iyo inta arday ee ku soo aadaysa kiiba waxaa soo baxday in ku dhow 21:1 (hal macallin kow iyo labaatanki arday-ba). Tirada macallimiinta ka hawl-gala jaamacadaha ayaa kala gaddisan. Sidoo kale, maadaama aan la kala soocin tirada macallimiinta dhigta kulliyad kasta, natiijada ardayda iyo macallimiinta is barbar dhiggooda ayaan macnaheedu ahayn in ardayda kala dhigata kulliyadaha kala duwan

ay haystaan macallimiinti ay u baahnaayeen. Shaxda 2-aad waxaa ay ku tusaysaa tirada macallimiinta tobanka jaamacadood ee dalka ugu waaweyn.

**Tusmo 2: Tirada macallimiinta 10-ka jaamacadood ee ugu waaweyn**

Jaamacadda	Ardayda	Barayaasha	Ardayda/Barayaasha
Jaamacadda Muqdisho	5240	292	18:1
Jaamacadda Soomaaliya	3912	134	20:1
Jaamacadda Hargeysa	4000	200	29:1
Jaamacadda SIMAD	3765	165	18:1
Jaamacadda Gollis	2778	25	23:1
Jaamacadda Camuud	3887	212	111:1
Jaamacadda Plasma ee Culumta iyo Teknoolajiyadda	2693	105	30:1
Jaamacadda Bariga Afrika	2700	91	26:1

#### 4.4 Heer aqooneedka macallimiinta

Jaamacadaha ayaa sidoo kale la waydiiyay heerarka aqooneed ee macallimiintooda. 2,501-da macallin ee wax ka dhiga jaamacadaha la daraaseeyay, 50% ayaa haystaa darajada Masterka, halka 39% ay haystaan darajada Bachelor-ka, 11%-ka soo haray ayaa lagu warbixiyay inay haystaan darajada PhD-da

Ma jiraan wax xariir ah oo ka dhaxeeya baaxadda jaamacadda iyo tirada macallimiinta haysta PhD-da. Tusaale ahaan, Jaamacadda Banaadir oo ku jirta kaalinta 9aad marka la fiiriyo tirada ardayda ayaa waxaa ka hawl gala macallimiinta ugu badan ee haysta darajada PhD (45), halka Jaamacadda Muqdishu oo ah jaamacadda ugu ballaaran xagga tirada ardayda ayay macallimiinta haysta darajada PhD-da ee ka hawl galay ay yihiin kaliya (46).

**Tusmo 3: Is-barbar dhig heerka aqooneed ee barayaasha**


Jaamacadaha	PhD	Masters	Bachelors
Jaamacadda Muqdisho	46	181	65
Jaamacadda Soomaaliya	4	86	44
Jaamacadda Hargeysa	3	10	187
Jaamacadda SIMAD	16	99	50
Jaamacadda Gollis	8	11	6
Jaamacadda Plasma ee Culumta iyo Teknoolajiyadda	15	40	50
Jaamacadda Bariga Afrika	11	52	28
Jaamacadda Camuud	10	146	56

Deegaanada ayaa ku kala gaddisan marka la eego tirada macallimiinta haysata darajada PhD-da ee ka hawl-gala deegaan kasta. Natiijada daraasadda ayaa muujinaysa in jaamacadaha ku yaalla Somaliland ay ka hawl-galaan macallimiinta ugu tirada yar ee haysta darajada PhD-da marka loo barbar dhigo kuwa koonfurta-bartamaha iyo Puntland.

#### 4.5 Tirada kulliyadaha iyo qaybohooda

Jaamacadaha ayaa waxaa la waydiiyay tirada iyo qaybaha kulliyadaha ay dhigaan. Jaamacadaha ayaa aad ugu kala gaddisnaa tirada kulliyadaha ay dhigaan, laga billabo Machadka Tababarka Macallimiinta Garoowe oo hal kulliyad ka kooban, illaa Jaamacadda Cammuud oo 15 kulliyadood ka kooban. Marka la fiiriyo jaamacadaha la waraystay, 68% waxay bixiyaan maaddooyin la xiriira kumbiyuutarka (computer), 59% waxay bixiyaan maaddooyin la xiriira cilmiga bulshada, 55% ayaa dhiga maaddooyinka la xiriira maamulka iyo maaraynta ganacsiga. Qaanuunka 56% ayaa dhiga maaddooyinka shareecada iyo qaanuunka.

**Tusmo 2: Sida ay kulliyadaha ugu kala badan yihiin jaamacadaha**



#### 4.6 Sida ardaydu u kala dhigtaan kulliyadaha

Maaddaama 68% jaamacadihii la daraaseeyay ay dhigayeen maaddooyinka kombuyuutar (computer)-ka la xiriira, ayaa waxaan layaab ahayn in 15% kamid ah guud ahaan ardayda dhigata jaamacadaha ku yaal koonfurta-bartamaha, Soomaaliland iyo Puntland ay ka diwaan gashan yihiin kulliyadaha la xiriira computer-ka. Celcelis ahaan 30% ayaa iyaguna dhigta kulliyadaha culuumta bulshada, maammulka iyo ganacsiga. Halka ay celcelis ahaan ardayda dhigata kulliyadaha caafimaadka ku lugta leh iyaguna ka yihiin in ku dhow 14% tirada guud ee ardayda. Qaanuunka iyo shareecada ardayda dhigata ayaa iyagu matala 13% guud ahaan ardayda.

Tirada ardayda warbixinta lagu sheegay ee ah 51,471 arday, ayaa ku dhawaad 44% ay ka diwaan gashan yihiin maaddooyinka la xiriira computer-ka, kulliyadaha cilmiga bulshada iyo maammulka ganacsiga qaybahooda kala gaddisan. Caqabadaha ka imaan kara arintan

ayaa ah marka ay ardaydan qalin jabiyaan iyagoo wata aqoon iyo khibrad isku mida una soo baxaan suuqa shaqada ayaa waxay adkayn kartaa inay helaan fursado shaqo. Dhigashada maaddooyin gaar ah oo diiradda la wada saaro ayaa cariiri ku keeni karta dhaqaalaha maaddaama aysan jiraynin xirfado kala duwan oo ay dadku kala dooran karaan, gaar ahaan xirfadaha la xiriira qaab dhismeedka dhaqaalaha Soomaalida (sida xirfadaha ku shaqada leh dhinaca cilmiga xoolaha).

Waxaa muuqata in deegaannadu ay ku kala duwan yihiin kulliyadaha ay ardaydu xiiseeyaan (fiiri shaxda 3). Tusaale ahaan, 81% ardayda ka diiwaan gashan kulliyada caafimaadka iyo maaddooyinka la xiriira ayaa waxay joogaan koonfurta-bartamaha. 79% ardayda dhigata injineerinka iyo 74% ardayda dhigata culuumta beeraha iyo xoolaha ayaa jooga Soomaaliland. Kala duwanaanta deegaannada ayaa waxaa suurto gal ah inay saamaynayso kala doorrashada kulliyadaha iyo takhasuska. Tusaale ahaan, ardayda dhigata cilmiga xoolaha ayaa dhamaantood ayaa waxay ka diiwn gashan yihiin Jaamacadda Camuud ee ku taalla Soomaaliland sidoo kale in ku dhow dhammaan ardayda dhigata kulliyada injineerinka ayaa dhigata Jaamacadda Gollis ee iyana ku taal Somaliland.

**Shax 4: Sida ay ardaydu u kala dhigtaan kulliyadaha**

Kuliyadda	Tirada ardayda dhigata	% intay ka yihiin tirada guud ee ardada
Komputerka & Tiknoolajiyada	7485	15%
Culuumta bulshada	8836	17%
Caafimaadka Bulshada	7004	14%
Maamulaka iyo Ganacsiga	6556	13%
Waxbarashada	4024	8%
Injineeriyada	3074	7.4%
Kuwo kale	1370	3%
Dhakhtarnimada	5339	7.4%
Qaanuunka iyo Shareecada	5339	10%
Luqadaha	530	1%
Daraasaadka Islaamka	487	1%
Beeraha iyo cilmiga daaqa	592	1%
Daraasaadka ka sare	618	1%
Farshaxanka	696	1%
Jiyoolajiyada	451	1%
Dhakhtarnimada Xoolaha	403	1%
Saxaafadda	151	0%
Daawada/ Farmsahiga	125	0%
Siyaasadda	94	0%
Ilkaha	81	0%
<b>Total</b>	<b>51,471</b>	<b>100%</b>

#### **4.7 Kaabayaasha**

Waxaa la waydiiyay jaamacadaha inay qeexaan adeegyada ugu waawayn ee ay u diyaariyaan ardayda iyo macallimiinta sida maktabado (oo lagu daray tirada buugta taal), maktabad kombiyuutar (computer laboratory) oo leh qalabka daabacaadda, iyo sheybaarrada sayniskaa (science laboratories). Natiijada la helay ayaa waxay oranaysaa inta badan hay'adaha la waraystay ayaa shaqeeya iyagoon haysan maktabado lagu kalsoonaan karo; 44-ta hay'adood ee la waraystay, 28 ka mid ah oo kaliya ayaa xaqiijiyay inay leeyihiin maktabad buugta taallaa ay tahay inta u dhaxaysa 300 illaa iyo 50,000. Wareysiyada qaar ayaa muujiyey in jaamacadaha qaar ay dhisayaan maktabado online ah. Waxaa intaa ka dheeraad ah, hal jaamacad oo qura ayaa sheegtay inay galaangal u leeyihiin kaydka joornaallada akadeemiga ah (academic journals).

32 kamida 44-tii jaamacadood ayaa ku warbixiyay inay haystaan ugu yaraan hal maktabad kombiyuuter (computer laboratory) oo wata qalabkii daabacaadda. Natiijadan ayaa waxaa lugu fiiriyay jaamacadihii sheegtay inay dhigaan maaddooyin la xiriira kombiyuutarka waxaana soo baxday in 30-ka jaamacadood ee dhigta kombiyuuterka, 24 kamid ah oo kaliya ay haystaan (computer laboratories). Natiijadaan ayaa waxay dhalinaysaa su'aalo ku saabsan sida loogu kalsoonaan karo tayada kulliyadahan oo kale.

Sidoo kale, 10-ka jaamacadood ee dhigta kulliyadaha enjineerinka ee kala gaddisan, ayaa afar ka mid ah oo qura ay haystana sheybaar cilmi ah (science laboratories). 14-ka jaamacadood ee dhiga caafimaadka iyo maaddooyinka la xiriira ayaa lix kamid ah oo kaliya ay leeyihiin shaybaarrada sayniska (science laboratories) inkastoo qaar kamid ah jaamacadaha dhiga caafimaadka ay wada shaqayn kala dhaxayso isbitaallada gudaha qaarkood, ardayduna ay ku tababbartaan sheybaarrada isbitaalka.

#### **4.8 Tayada cilmi baarista iyo bandhig qoraaleedka**

Baaxadda cilmi baariseed iyo bandhig qoraallada jaamacadaha dalka oo idil ayaa aad u hooseeya. 15 kamid ah 44-ta jaamacadood ee la daraaseeyay ayaa sheegatay in ugu yaraan ay ka qayb qaataan hal bandhig qoraaleed (academic publication); inta badan bandhig qoraallada ay sheegeen jaamacaduhu inay sameeyeen ayaa ahaa kuwa la xiriira dhinacyada cilmiga bulshada. Ma jirin jaamacad sheegatay inay ka qayb qaadatay wax hawl cilmi baaris ah. Waxaa la wada ogsoon yahay in cilmi baarista iyo bandhig qoraaleedyada-ba lagu tiriyo astaamaha lagu garto wixtarnimada iyo tayada hay'adaha waxbarashada, waxaana sidoo kale la fiiriyay inay wax xiriir ah ka dhaxeeyaan tirada macallimiinta haysata darajada PhD-da ee ka hawl-gala jaamacadaha iyo tayada cilmi baariseed iyo midda bandhig qoraaleed ee ay sheegteen jaamacaduhu. Waxaa xogta ku caddaatay in aysan jirin wax xiriir ah oo la taaban karo. Tusaale ahaan, Jaamacadda Banaadir, oo kamid ah jaamacadaha ay ka hawl-galaan tirada ugu badan ee macallimiinta haysata darajada PhD-da (45) ayaa samaysay hal bandhig qoraaleed oo kaliya (academic publication), halka Jaamacadda Gollis oo 8 kamid ah macallimiintooda oo kaliya ay haystaan darajada PhD-da, ay ka sameeyeen shan bandhig qoraaleed (academic Publications). Jaamacadda Muqdisho oo ay ka hawl galaan 46 macallin oo haysta darajada PhD-da ayaan samaynin wax bandhig qoraaleed ah (academic Publications).

#### **4.9 Xirirka kala dhexeeya jaamacadaha kale**

Jaamacadaha ayaa waxaa la waydiiyay xiriirka kala dhexeeya jaamacadaha kale ee deegaanka iyo kuwa dibadda-ba. 36 kamid ah 44-tii jaamacadood ee la waraystay ayaa sheegay in xiriir uu kala dhexeeyo jaamacado kale oo ku yaalla dibadda iyo gudaha dalka-ba. Waxaa la yaab ah, jaamacadahan ayaa intooda badan sheegay in xiriirka kala dhexeeya jaamacadaha kale uu ku saleysan yahay is-waydaarsi cilmi baaris. Waxaase is waydiin mudan sida xiriirkan uu miro dhal u yahay maadaama aysan jaamacaduhu xusin wax cilmi baaris ah oo ay sameeyeen.



#### **4.10 Maamulka waxbarashada sare**

Arrinta kaliya ee midaysa horumarkan xowliga ku socda ee hay'adaha waxbarashada sare ee dalka ayaa ah, tirada kala duwan ee milkiilayaasha iyo aasaasayaasha isugu jira. Jaamacadaha qaar ayaa waxaa aasaasay dad Soomaaliyeed oo dal joog iyo qurbo joog-ba leh, halka kuwo kale ay aasaaseen hey'ado diimeed ama ganacsato. Waxaa halkaas ka muuqan karta kala duwanaanta milkiilayaasha jaamacadahan. Tusaale ahaan, Jaamacadaha Camuud, Hargaysa iyo Burco ayaa waxaa aasaasay dad isugu jira dal joog iyo qurbo joog, lakiin waxaa markii danbe la wareegay gacan ku hayntooda maamulka dowladda Soomaaliland. Marka la fiiriyo gacan ku haynta hay'adaha waxbarashada sare ayaa waxaa caddaanaysa in dowladdu ay ku leedahay kaalin aad u kooban, sababo la xiriira tabar darro dhaqaale oo haysa dowladda awgeed.

Jaamacadaha ayaa la waydiiyay cidda ay hoos tagaan, 22 ka mid ah 44-tii jaamacadood ee la waraystay ayaa ku jawaabay inay hoostagaan ururro iyo dallado waxbarasho. 9 jaamacadood ayaa sheegtay inay gabi ahaan-ba madax banaan yihiin, halka 7 kale ay ku warbixiyeen inay hoos tagaan maamul goboleed ama dowladda federaalka ah. Waxaan la hayn xogta siddeed jaamacadood.

Inkastoo inta badan jaamacadaha ay soo hadal qaadeen inaysan hoos tagin maammullada dhexe ama dowladda federaalka ah, haddana 84% ka mid ah jaamacadaha la waraystay ayaa sheegay inuu xariir kala dhexeeyo maamulka ka taliya deegaannadooda. Hase yeeshee, jaamacadaha intooda badan ayaa sheegay in heerka xiriir ee kala dhexeeya maammullada ka taliya deegaannadooda uusan dhaafsiisnayn is diwaan galin iyo wixii la mid ah; lakiin uusan jirin wax xariir rasmi ah oo dhex mara. Tan waxaa lagu macneyn karaa maqnaanshaha hey'ad dowladeed oo kormeerta hannaanka waxbarashada sare.

Waxaa soo muuqanaya ifafaalo ah in maammulladu ay qorshaynayaan inay la wareegaan gacan ku haynta waxbarashada sare. Tusaale ahaan, sababaha maamulka Somaliland u sameeyay qorshaha istiraatiijiyadda waxbarashada ee 2012-2016, ayaa ah si kor loogu qaado ka warqabka iyo indho indhaynta nidaamka waxbarashada sare ee sida gaarka ah loo leeyahay, is badallo kuwaan lamid ah ayaa sidoo kale lagu wadaa inay ka hirgalaan nidaamka waxbarashada sare ee maamul goboleedka Puntland.

#### **4.11 Qaab dhismeedka maaliyadeed**

14 kamid ah 22-ka jaamacadood ee la waresytay ee ku yaalla koonfurta-bartamaha, ayaa sheegay dhaqaale ahaan inay si buuxda ugu tiirsan yihiin lacagaha laga qaado ardayda. 8-da kale ayaa sheegay inay gacan qabasho maaliyadeed ka helaan banaanka (hey'ado caalami ah, qurbo-joogta iyo hay'adaha Islaamiga ah). Jaamacadaha koonfur-bartamaha Soomaaliya ku yaal ayaa sheegay inaysan ka helin wax gacan qabasho maaliyadeed ah dawladda. Xaallada Somaliland ayaa ka duwan. Inkastoo jaamacadaha ku yaal deegannada la waraysatay oo idil ay ku tiirsan yihiin lacagaha laga qaado ardayda si ay u daboolaan kharashaadkooda, lakiin marka laga reebo (Jaamacadda Admas) inta hartay ayaa hela mucaawino maaliyadeed oo ah inta u dhaxaysa 3% iyo 20% kharashaadka ay ku hawl-galaan inkastoo intooda badan ay qaataan inta u dhaxeysa 3% iyo 5%. Puntland ayaa lamid ah Somaliland. Lix ka mid ah 9-ka jaamacadood ee laga waraystay Puntland ayaa sheegay in taageero dhaqaale oo u dhaxaysa 5% iyo 70% ay ka helaan maamulka. (Jaantuska-ka 3-aad ayaa waxa uu muujinayaa qaab dhismeedka maaliyadeed ee jaamacadihi la daraaseeyay).

Jaamacado badan ayaa ayaguna sidoo kale ku warbixiyay inay kaalmo ka helaan deeq bixiyayaal. Deeqahaan ayaa daboolaa inta u dhaxaysa 2% illaa 100% kharashaadka ay jaamacadahaasi ku shaqeeyaan. Deeq bixiyayaashan ayaa waxaa ka mida Soomaalida qurbo joogta ah, Hay'adda Muslim Aid, SIDA (Swedish International Development Cooperation Agency), Midowga Yurub, Sanduuqa Maal-galinta Bulshada ee UN-ta (UNFPA), Hay'adda

Caafimaadka Adduunka (WHO), Jamhuuriya Foundation, Towfiiq Welfare Society, iyo shirkadda war isgaarsiinta ee Hormuud Telecom. Marka la fiiriyo xogtan ayaa waxaa muuqanaysa sida deeq bixiyayaashu ay u kala joogaan deegaannada kala duwan. Tusaale ahaan, deeq bixiyayaasha islaamiga ah ayaa waxaa muuqata inay u badan yihiin koonfurta-bartamaha markii loo barbar dhigo Somaliland iyo Puntland. Muuqalkan ayaa ku qotoma ra'yiga ah in colaadaha iyo dagganaansho la'aanta daba dheeraatay ee ku habsaday koonfurta iyo baratamaha Soomaaliya ay keeneen inay in badan oo kamid ah hay'adihii reer galbeedka ee ka hawl-galayay deegannadaas ay isaga baxaan, halka qaar badan oo kamida hay'adaha gargaarka ee Islaamiga ah aysan ka bixin waddanka intii ay jirtay daganaansho la'aantu.

#### **4.12 Baahida iyo caqabadaha**

Caqabadaha iyo culaysyada soo food saara hey'adaha waxbarashada sare (HWS) ee dalka ayaa waxay isugu jiraan kuwo la xiriira amni xumo, tayo darro guud oo hay'adeed, shaqaalaha ay haystaan iyo kaabayaasha ay ku hawl-galaan oo aan tayaysnayn, dhaqaalaha oo aad u xaddidan iyo agab-kii wax lagu baran lahaa oo aanay haysan ama aan ku filnayn daboolidda baahida loo qabo. Inay ka hawlgasho ugu yaraan 50 hayad waxabarasho sare waddan baaxad le'eg Soomaaliya ayaa ah wax walwal ku abuuraya bulshada waxbarashada. Inta badan 44-tii hay'adood ee la waraystay ayaa sheegay in caqabadda ah isku filnaansho la'aanta maaliyadeed ay tahay midda ugu wayn ee hortaagan. Ku dhawaad dhammaan jaamacadaha la waraystay (96%) waxay sheegeen in yaraanta agab-ka wax barrida ay tahay caqabadda labaad ee ugu weyn, halka (89%) ay sheegeen in maqnaanshaha aasaaska nidaamkii jaamacadeed oo dhisan uu yahay caqabad weyn, qalabkii wax lagu baran lahaa ama lagu bari lahaa-ba oo aad u yar ayaa ah baahi kale oo (89%) ay qabaan, shaqaale jaamacadeed oo tayo leh una tababaran ayaa iyadana in la helo ay ku dhib badan tahay, sidoo kale (89%) ayaa iyaguna ku cawday inaysan jirin shaqaale maamul oo tayo leh, (86%), dhismayaal iyo xarumo jaamacadeed la'aan ayaa waxaa ka sheegtay (73%), manhaj waxbarasho oo horumarsan iyaa isagana ka mid ahaa caqabadihii ay ka sheegteen 18% jaamacadihii lala kulmay.

Caqabadaha warbixinta lagu sheegay ayaa qaarkood waxay u gaar yihiin deegaannada qaar. Tusaale ahaan, jaamacadaha Somaliland ayaa ka sheegtay aqoonsi la'aan maadaama aysan bulshada caalamku u aqoonsan Somaliland waddan madax bannaan, taasoo kahor istaagtay inay wax xiriir la taaban karo ah la yeeshaan jaamacadaha ku yaalla dibadda. Dhanka kale, jaamacadaha ku yaal koonfurta-bartamaha Soomaaliya ayay amni darradu kamid tahay caqabadaha ugu waawayn ee ay ka cawdeen.

## Cutubka 5aad: Gunaanad iyo talooyin

Waxbarashada sare ayaa si xooggan u kobcaysay wakhtiyadii lasoo dhaafay gobollada Somaliland, Puntland iyo koonfurta-bartamaha. Inkastoo ay jiraan horumarro badan oo degdeg ah dhanka waxbarashada markii loo eego xaaladihii joogtada ahaa ee waddanku soo maray 20-tameeyadii sano ee lasoo dhaafay, haddana waxaa walwal ka imaanayaa sida loogu kal-soonaan karo tayada waxbarashada la bixiyo. Walwalkaan ayaa waxa uu xaqiijinayaa baahida loo qabo faragalin iyo waxqabad degdeg ah ayadoo la fiirinayo waxyeellada caqabadaha ay ka warbixiyeen jaamacaduhu inay hor taagan yihiin. Waxaa sidoo kale lagama maarmaan ah in maamul-goboleedyada ka jira deegaannadaas ay ku lug yeeshaan kana war qabaan HWS.

In arday badani ay door bidaan maaddooyinka la xiriira kombuyuutar-ka iyo maammulka ayaa waxaa ka imaanaya su'aasha ah: intee in le'eg ayay muhiim u yihiin maaddooyinka la bixiyaa baahida ay dhaqaalaha iyo horumarka waddanku-ba u qabaan iyo maslaxadda ugu jirta dalka aqoonta noocaas ah?. Annagoo haysanna natiijada daraasaddan, ayaa talooyinka soo socda waxaan u soo jeedinaynaa dhammaan ka qayb qaatayaasha nidaamka waxbarashada sare. Talooyinka ma ahan kuwa dhammeystiran; waxay ka tarjumayaan oo kaliya natiijadii kasoo baxday daraasadda iyo inta uu ku sinnaa hadafkeeda.

### Talo bixin

Talo bixinta soo socota ayaa waxa ay ka dhalatay natiijooyinkii kasoo baxay daraasaddan waxayna ku wajahan jihin dhammaan ka qayb qaatayaaasha nidaamka waxbarashada sare ee Soomaaliya: Dawladda Federaalka ah ee Soomaaliya, Maamul-goboleedyada (Puntland iyo Somaliland), deeq bixiyayaasha caalamiga ah iyo HWS. Talooyinkan ayaan marnaba ahayn kuwo dhammaystiran ama ka jawaabaysa wax walba ee waxay ka tarjumayaan oo kaliya natiijadii kasoo baxday daraasaddi la sameeyay oo ahayd mid koban, billow-na ah.

### Ku socota Dawladda Federaalka Soomaaliya:

- Kala shaqee ururrada iyo dalladaha waxbarasho ee dalka ka jira sidii loo sameyn lahaa siyaasad qaran oo midaysan kuna beegan nidaamka waxbarashada sare ee dalka, gacanna ka geysto horumarinta tayada waxbarashada sare si loo daboolo baahida aasaasiga ee ka jirta HWS.
- Yagleel Golaha Waxbarashada Sare oo hawl-galiya, kormeer iyo qiimaynna ku sameeya tayada waxbarashada, kana shaqeeya horumarinta siyaasado isku xiraya hawlaha HWS iyo qorshayaasha horumarinta qaran-ka.
- Ka caawi maamul-goboleedyada sare u qaadidda tayada waxbarashada.
- Ka caawi jaamacadaha dalka oo dhan—oo ay Somaliland ku jirto-- xiriirka jaamacadaha dibadda, iyo sidii ay u heli lahaayeen taageero dhaqaale oo dibadda ah.
- Dhiirri gali jaamacadaha si ay u sameystaan tayo cilmi baaris iyo iyo bandhig qoraaleedyo.

### Ku socota maamul goboleedyada iyo dowladaha hoose:

- La shaqeeya ururrada iyo dalladaha waxbarasho ee jira, si loo horumariyo siyaasadda waxbarashada taas oo la jaan-qaadi karta siyaasadaha guud ee qaranka.
- Abuura hay'ado kormeer, qiimaynna ku sameeya tayada iyo heerarka jaamacadda.
- Dhiirri galiya jaamacadaha gudaha inay xiriirro wax-ku-ool ah la yeeshaan jaamacadaha kale ee dalka iyo kuwa dibaddaba.

### Ku socota deeq bixiyayaasha caalamigaa:

- Gacan ka geysta tayaynta hay'adaha maamul-goboleedyada iyo dowladaha hoose u qaabilsan waxbarashada.
- Gacan ku siiya Dawladda Federaalka Soomaaliya sidii loo yagleeli lahaa siyaasad

qaran oo ay yeelato waxbarashada sare, kana tarjumaysa baahida taagan ee shacabka Soomaaliyeed.

- Taageera hey'adaha waxbarashada ka shaqeeya ee Soomaaliya ka hawl-gala.
- Sii wada deeqaha waxbarasho ee aad u fidisaan HWS iyo ardayda Soomaaliyeed.

**Ku socota hay'adaha waxbarashada ware:**

- Sameeya qaab lagu qiimayn karo tayada macallimiinta, duruusta iyo kaabayaasha.
- U istaaga tayaynta waxqabad ee macalimiinta iyo shaqaalaha maamulka.
- Xiriir macno leh la sameysta hay'adaha kale ee ka jira gobolka iyo dibadda.
- Ku dhiirri galiya macalimiinta jaamacadaha inay joogteeyaan cilmi baarista iyo soona saaraan bandhigid qoraallo.

## Xigasho

- Abdi, A. A. (1998). *Education in Somalia: History, destruction, and calls for reconstruction*. *Comparative Education*, 34(3), 327-340.
- Abdinoor, A. (2008). *Community assumes the role of state in education in stateless Somalia*. *International Education*, 37(2), 43-61.
- Banafunzi, B. M. S. (1996). *The Education of the Bravanese Community: Key issues of culture and identity*. *Educational Studies*, 22(3), 331-342.
- Bradbury, M. (2008). *Becoming Somaliland*. Oxford: James Currey.
- Cassanelli, L., & Abdikadir, F. S. (2008). *Somalia: Education in transition*. *Bildhaan*, 7(1), 91-125.
- Cummings, W. K., & van Tonningen, L. R. (2003). *Somalia Education Sector Assessment: With special attention to Northwest Zone*.
- Dawson, G. G. (1964). *Education in Somalia*. *Comparative Education Review*, 8(2), 199-214.
- Farah, A. O. (2009). *Diaspora involvement in the development of Somalia*. Aalborg East: Aalborg University.
- Hoehne, M. (2010). *Diasporic Engagement in the Educational Sector in Post-conflict Somaliland: A contribution to peacebuilding*. University of Jyväskylä.
- Hussein, A. (2012). *Freirian and Postcolonial perspectives on E-learning Development: a case study of staff development in an African university*. *The International Journal of Critical Pedagogy*, 4(1), 135-153.
- Leeson, P. T. (2007). *Better off stateless: Somalia before and after government collapse*. *Journal of Comparative Economics*, 35(4), 689-710.
- Lindley, A. (2006). *The influence of migration, remittances and diaspora donations on education in Somali society*. *Remittances and Economic Development in Somalia, Social Development Papers*, 38, 9-18.
- Lindley, A. (2008). *Transnational connections and education in the Somali context*. *Journal of Eastern African Studies*, 2(3), 401-414.
- Samatar, A. I. (1994). *The Somali challenge: From catastrophe to renewal?* London: Lynne Rienner.
- Samatar, A. I. (2001). *Somali reconstruction and local initiative: Amoud University*. *World Development*, 29(4), 641-656.
- Somaliland Ministry of Education and Higher Education (2012) *Somaliland's Education Sector Strategic Plan 2012-2016*. Hargeisa. Somaliland.
- Somaliland Ministry of National Planning and Development (2011) *Somaliland in Figures*. Hargeisa: Somaliland.
- Somaliland Ministry of National Planning and Development (2011) *National Development Plan (2012-2016)*. Hargeisa: Somaliland.
- Somaliland Ministry of National Planning (2011) *Somaliland National Vision 2030*. Hargeisa: Somaliland.
- Transitional Federal Government Ministry of Education, Culture and Higher Education (2011) *Education Report, School Year 2010-2011*. Mogadishu: Transitional Federal Government Ministry of Education, Culture and Higher Education
- UNICEF (2011) *UNICEF Somalia Annual Report 2010*. Nairobi: UNICEF Somalia.
- Varghese, N. V. (ed.) (2007) *New Trends in Higher Education: Growth and Expansion of Private Higher Education in Africa*. Paris: UNESCO.

## Lifaaqyo

### Lifaaq1: HWS ee la waraystay iyo deegaannada ay ku kala yaallaan

South-Central	Somaliland	Puntland
Jaamacadda Badwaynta Hindiya	Jaamacadda Camuud	Jaamacadda Bariga Afrika
Jaamacadda Muqdishu	Jaamacadda Hargaysaa	Jaamacadda Puntland State
Jaamacadda Darul-Ulum	Jaamacadda Burco	Jaamacadda Puntland ee Culuumta iyo Teknoolajiyadda
Jaamacadda Xamar	Jaamacadda Geeska Afrika ee Caalamigaa	Jaamacadda Caalamigaa ee Gaalkacyo
Jaamacadda SIMAD	Jaamacadda Nugaal	Machadka Tababarka Macallimiinta ee Garoowe
Jaamacadda Islaamka	Jaamacadda Gollis	Jaamacadda Boosaaso
Jaamacadda Banadir	Jaamacadda Admas	Jaamacadda Culuumta Caafimaadka
Jaamacadda Kismayo	Jaamacadda Eelo American	Jaamacadda University – Xarunta Boosaaso
Jaamacadda Plasma ee Culuumta iyo Teknoolajiyada	Jaamacadda Hope	Jaamacadda Maakhir
Jaamacadda Somaliya	Jaamacadda Alpha	
Jaamacadda Koonfurta Soomaaliya	Jaamacadda New Generation	
Jaamacadda Hormuud	Jaamacadda Timacade	
Jaamacadda Jazeera	Jaamacadda Beder ee Caalamigaa	
Jaamacadda Salaam		
Jaamacadda Geeska Afrika		
Jaamacadda Horseed		
Jaamacadda Jamhuuriya		
Jaamacadda Hope		
Jaamacadda Job-key		
Jaamacadda Modern ee Cilmiga iyo Teknoolajiyadda		
Jaamacadda Caalamigaa ee Soomaaliya		
Jaamacadda Darul-Hikma		
<b>Total: 22</b>	<b>Total: 13</b>	<b>Total: 9</b>

## Lifaaq 2: Qaybakaha kulliyadaha iyo tirada ardayda

Kulliyadda	Tirada Ardayda Dhigata dhamman Gobolada	Ardayda koonfurta iyo bartamaha	% Guud ahaan ardayda barata kulliyaddas	ardayda Puntland	% Tirada Guud ee ardayda dhigata kulliyadda	Ardayda Somaliland	% Ardayda guud ee dhigata Kulliyaddaas faculty
Cilmiga Bulshada	8836	4961	56%	1399	16%	2476	28%
Komputerka iyo Teknoolajiyadda	7485	3583	48%	1150	15%	2752	37%
Caafimaadka Bulshada	7005	5655	81%	183	3%	1167	17%
Maamulka iyo Ganacsiga	6556	2608	40%	1594	24%	2354	36%
Qaanuunka Iyo Shareecada	5339	2205	41%	1481	28%	1653	31%
Waxbarashada	4024	1438	36%	1012	25%	1574	39%
Dhakhartnimada	3554	1796	51%	569	16%	1189	33%
Injineeriyadda	3074	413	13%	240	8%	2421	79%
Kuwo kale*	1370	264	19%	0	0%	1106	81%
Farshaxanka	696	696	100%	0	0%	0	0%
Daraasaadka Sare	618	358	58%	138	22%	122	20%
Beeraha iyo Cilmiga Daaqa	592	156	26%	0	0%	436	74%
Luqadaha	530	330	62%	200	38%	0	0%
Daraasaadka Islaamka	487	306	63%	30	6%	151	31%
Jiyoolajiyadda	451	0	0%	0	0%	451	100%
Dhakhartnimada Xoolaha	403	145	36%	55	14%	203	50%
Saxaafadda	151	151	100%	0	0%	0	0%
Daawada/ Farmashiga	125	0	0%	50	40%	75	60%
Siyaasadda	94	82	87%	0	0%	12	13%
Ilkaha	81	0	0%	0	0%	81	100%
<b>Wadar</b>	<b>51,471</b>	<b>25147</b>		<b>8101</b>		<b>18223</b>	

### Lifaaq 3: Meelaha Dakhligu ka soo galo HWS

Magaca	% lacagta ardayda laga qaado	% Dawladdu ku gacan qabato	% Deeq bixiyayaashu ka caawiyay
Jaamacadda Banadir	95	0	5
Jaamacadda Xamar	100	0	0
Jaamacadda Hope	100	0	0
Jaamacadda Hormuud	60	0	40
Jaamacadda Geeska Afrika	100	0	0
Jaamacadda Horseed	40	0	60
Jaamacadda Badwaynta Hindiya	100	0	0
Jaamacadda Islaamka	100	0	0
Jaamacadda Jamhuuriya	40	0	60
Jaamacadda Jazeera	100	0	0
Jaamacadda Job-key	100	0	0
Jaamacadda Kismaayo	10	0	90
Jaamacadda Modern ee Cilmiga iyo Teknoolajiyadda	100	0	0
Jaamacadda Muqdisho	71	0	29
Jaamacadda Plasma ee Culuumta iyo Teknoolajiyadda	100	0	0
Jaamacadda Salaam	100	0	0
Jaamacadda SIMAD	70	0	30
Jaamacadda Caalamigaa ee Soomaaliya	100	0	0
Jaamacadda Darul-Hikma	100	0	0
Jaamacadda Darul-Ulum	100	0	0
Jaamacadda Somaliya	100	0	0
Jaamacadda Koonfurta Soomaaliya	70	0	30
Jaamacadda Bariga Afrika	100	0	0
Jaamacadda Caalamigaa ee Gaalkacyo	70	30	0
Machadka Tababarka Macallimiinta ee Garoowe	0	0	100
Jaamacadda Maakhir	30	70	0
Jaamacadda University – Xarunta Boosaaso	70	30	0
Jaamacadda Puntland State	80	5	15
Jaamacadda Puntland ee Culuumta iyo Teknoolajiyadda	80	10	10
Jaamacadda Boosaaso	50	20	30
Jaamacadda Culuumta Caafimaadka	80	0	20
Jaamacadda Admas	100	0	0
Jaamacadda Alpha	90	5	5
Jaamacadda Camuud	95	3	2
Jaamacadda Beder ee Caalamigaa	90	5	5



Jaamacadda Burco	80	10	10
Jaamacadda Eelo American	80	20	0
Jaamacadda Gollis	90	5	5
Jaamacadda Hope	85	10	5
Jaamacadda Geeska Afrika ee Caalamigaa	80	10	10
Jaamacadda New Generation	90	5	5
Jaamacadda Nugaal	80	10	10
Jaamacadda Timacade	95	3	2
Jaamacadda Hargaysaa	95	3	2

#### Lifaaq 4: Kulliyadaha iyo ardayda tiradooda

Magac	Deegaa	Aasa-say	Tirada Kulliyadaha	Tirada guud ee ardayda
Jaamacadda Muqdishu	Koonfurta-Bartamaha	1996	7	5240
Jaamacadda Hargaysaa	Somaliland	2000	9	4000
Jaamacadda Soomaliya	Koonfurta-Bartamaha	2005	7	3912
Jaamacadda Cammuud	Somaliland	1998	15	3887
Jaamacadda SIMAD	Koonfurta-Bartamaha	1999	5	3765
Jaamacadda Gollis	Somaliland	2005	9	2778
East Africa University	Puntland	1999	8	2700
Jaamacadda Plasma ee Culuumta iyo Teknoolajiyada	Koonfurta-Bartamaha	2005	7	2693
Jaamacadda Banaadir	Koonfurta-Bartamaha	2002	7	1613
Jaamacadda Admas	Somaliland	2006	3	1431
Jaamacadda Puntland State	Puntland	2004	4	1375
Ejaamacadda elo American	Somaliland	2007	7	1340
Jaamacadda Nugaal	Somaliland	2004	7	1258
Jaamacadda Caalamigaa ee Soomaaliya	Koonfurta-Bartamaha	2012	10	1125
Jaamacadda Alpha	Somaliland	2009	13	1072
Jaamacadda Muqdishu- Xarunta Boosaaso	Puntland	2008	6	1039
Jaamacadda Islaamka	Koonfurta-Bartamaha	2001	5	1022
Jaamacadda Bosasso	Puntland	2006	5	947
Jaamacadda Horsed	Koonfurta-Bartamaha	2011	4	882
Jaamacadda Badwaynta Hindiya	Koonfurta-Bartamaha	1993	3	712
Jaamacadda Hope	Koonfurta-Bartamaha	2012	6	700
Jaamacadda Burco	Somaliland	2004	7	700
Jaamacadda Puntland ee culuumta iyo Teknoolajiyada	Puntland	2004	9	660
Jaamacadda International Horn	Somaliland	2004	4	600
Jaamacadda Caalamigaa ee Gaalkacyo	Puntland	2005	4	590

Jaamacadda Modern ee Culuumta Iyo Teknoolajiyadda	Koonfurta-Bartamaha	2012	5	523
Jaamacadda Geeska Afrika	Koonfurta-Bartamaha	2011	5	512
Jaamacadda Koonfurta Soomaaliya	Koonfurta-Bartamaha	2008	5	495
Jaamacadda Jamhuriya	Koonfurta-Bartamaha	2011	4	463
Jaamacadda New Generation	Somaliland	2009	5	415
Jaamacadda culuumta Caafimaadka	Puntland	2006	7	400
Jaamacadda Darul-Ulum	Koonfurta-Bartamaha	1998	3	300
Jaamacadda Caalamigaa ee Beder	Somaliland	2012	3	300
Jaamacadda Timacade	Somaliland	2009	5	260
Jaamacadda Kismayo	South-Central	2005	4	250
Machadka Tababarka Macallinimada ee Garoowe	Puntland	2005	1	240
Jaamacadda Jazeera	Koonfurta-Bartamaha	2010	3	200
Jaamacadda Job-Key	Koonfurta-Bartamaha	2012	3	200
Hamar University	Koonfurta-Bartamaha	1999	3	190
Jaamacadda Hope	Somaliland	2008	2	182
Jaamacadda Hormud	Koonfurta-Bartamaha	2010	1	150
Jaamacadda Maakhir	Puntland	2011	3	150
Jaamacadda Salaam	Koonfurta-Bartamaha	2010	3	100
Jaamacadda Darul-Hikma	Koonfurta-Bartamaha	2012	2	100



